

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةُ صَوْمَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 2aad	Cadadka: 8aad ee August	Taariikh: 07/09/2013
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.</i>		

**TUSMADA CADADKA**

<p><b><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</b></p> <p>1) SOOMA BIXIN</p> <p><b><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA</b></p> <p><b>MADAXWEYNAHA:</b></p> <p>2) BIXIN DERAJO, <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0325/082013</u></p> <p>3) CAFIS MADAXWEYNE,</p>	<p>647</p> <p>648</p> <p>651</p>
---	----------------------------------

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,


WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM

- |   |     |
|---|-----|
| 4) Joojin Bixinta dhulka Danta Guud,<br><u>WAREEGTO WASIIR</u> , Wasaarada<br>Hawlaha Guud Guryeynta &<br>Gaadiidka (DHAMAYSTIR BISHII<br>HORE)                 | 655 |
| 5) Fulin Go'aan Kasoo Baxay Gudiga<br>Cadaaladda JSL,<br><u>WAREEGTO WASIIR</u> , Wasaarada<br>Cadaalada iyo Arrimaha Garsoorka                                 | 656 |
| 6) Diiwaangalin Movement of S/land<br>Aid Development Agency,<br><u>WAREEGTO WASIIR</u> , Wasaarada<br>Qorsheynta Qaranka iyo<br>Horumarinta 08/2013            | 657 |
| 7) Diiwaangalin Makhir Prevention of<br>infectious Disease and Pandemic,<br><u>WAREEGTO WASIIR</u> , Wasaarada<br>Qorsheynta Qaranka iyo<br>Horumarinta 08/2013 | 658 |
| 8) Diiwaangalin Somaliland Association<br>Accountants,<br><u>WAREEGTO WASIIR</u> , Wasaarada<br>Qorsheynta Qaranka iyo<br>Horumarinta 08/2013                   | 659 |
| 9) Diiwaangalin Dangarad Youth  |     |

Development Org,  
WAREEGTO WASIIR, Wasaarada  
Qorsheynta Qaranka iyo  
Horumarinta 08/2013



- 10) Diiwaangalin Women Association  
Gender Awareness,  
WAREEGTO WASIIR, Wasaarada  
Qorsheynta Qaranka iyo  
Horumarinta 08/2013

661  
662  
664

666

667

**QAYBTA AFRAAD: AMARADA &**

669

**GO'AANADA MAAMUL**

- 11) Diiwaan Gelin Shirikada Guleid  
Construction and Transportation,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 12) Diiwaan Gelin Shirikada Fonex LTD,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 13) Diiwaan Gelin Shirikada Al Aqsa Import  
& Export Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 14) Diiwaan Gelin Shirikada Roble  
Construction Contracting Company,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 15) Diiwaan Gelin Shirikada Hiraal Children's  
Entertainment Center,  
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud
- 16) Amar Xayiraad Dhul Dayran,  
Maxkamadda Gobolka Saaxil Berbera
- 17) Amar Xayiraad Guri No, GL-M/B-1/7 iyo  
G uri.No.GL-M/B-1/12,  
Maxkamadda Degmadda Hargeysa

672

**QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA**

- 18) SOOMA BIXIN



**QAYBTA LABAAD:**

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO  
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

**REPUBLIC OF  SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1948/082013

04/08/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0325/082013**

**Bixin Derajo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa  
4aad, ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda  
Somaliland;



Markuu Arkay: In ay lagama maarmaan  
tahay in Dhamaan  
Ciidamada Qaranka la siiyo  
Derajooyin ay mutaysteen;

Markuu Tixgeliyey: Magacaabidii Guddida  
Hirgelinta Derajo-bixinta iyo  
talo bixintoodii;

Markuu Tixgeliyey: Talo soo jeedintii Guddida  
Nabadgelyada Qaranka ee  
Derajo Bixinta khusaysa;

Markuu Garwaaqsaday: Xilka naf-huridda iyo  
heeganka joogtaysan ee  
Qarankan u hayaan;

Markuu Ku-qancay: In bixinta derajada  
Ciidamadu ay kor u qaadi  
doonto Milgaha iyo Sharafta  
Ciidamadeena iyo  
Haybadda Dawladnimo;

### Wuxuu Go'aansaday

Dhamaystirka Derajada ciidamada kala duwan ee  
Qaran in ka badan 10,000 oo Askari oo u dallacay  
derajooyin kala duwan ee u dhexeeya Alifle ilaa  
Sareeye –Gaas, isla markaana Madaxweynuhu  
wuxuu go'aamiyey in Dhamaan ciidamada loo  
kordhiyo Gunno Derajo iyadoo lagu salaynayo  
Derajada iyo dallacaada kala duwan, korodhka

Gunnada Derajada oo ka bilaabmaya September 2013. Waxaa la farayaa Taliyeyaasha Ciidamada kala duwan in derajooyinka si rasmi ah loo bixiyo munaasabadda ciidal-Fidriga.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-1981/082013

18/08/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0326/082013**

## Cafis Madaxweyne

### **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka (90)aad,  
Faqradiisa (5)aad, Xarafka  
(Kh) ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda  
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka (149)aad ee  
Xeerka Ciqaabta Guud;

Markuu Arkay:

Xukunka Maxkamadda  
Gobolka Hargeysa  
MGH/DDL/598/2013 ee  
03/07/2013;



Markuu Tixgeliyey:

Codsiga Cafiska ah ee ay  
soo gudbiyeen Guddida  
Suxufiyiinta Somaliland iyo  
Xukunsanayaashu;

### Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Xukunsanayaasha kala ah:

1. Maxamed Axmed Jaamac (Calooley), oo ay maxkamaddu ku xukuntay Hal Sanno oo xadhig ciqaabeed ah iyo Laba Milyan oo Somaliland shillings oo ganaax lacageed ah.
2. Xasan Xuseen Cabdilaahi (Keef-keef), oo ay maxkamaddu ku xukuntay Laba sanno oo xadhiga ah iyo Laba Milyan oo Somaliland shillings oo ganaax lacageed ah.
3. Xayiraadii oo laga qaaday wargeyska Hubaal.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**QAYBTA SADEXAAD:**  
**DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,**  
**AMARADA**



# IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA

## WASIIRADA, IWM



Republic of Somaliland  
Ministry of Public Works  
Housing & Transport



Jamhuuruyada Somaliland  
Wasaaradda Hawlaha Guud  
Guriyeynta & Gadiidka

### OFFICE OF THE MINISTER

---

Ref WHG/G&G/XW/580/2013

Date: 31/7/2013

KU: Guddoomiyaasha Gobolada Dalka

KU: Gudoomiyaasha Deegaanada Dalka

KU: Wasiirka Arimaha Gudaha JSL

KU: Taliyaha Ciidanka Booliska

KU: Isuduwayaasha Gobolada ee WHG/G/&  
Gaadiidka

OG: Wasiirka ku Xigeenka HGG&G

OG: Agaasimaha Guud ee WHG/G/& Gaadiidka

OG: Agaasimaha Waaxda Dhulka ee WHG/G/

OG: Madaxeynaha JSL

UJeeddo: Joojin Bixinta dhulka Danta Guud.

Tixraac Digreetada **Madaxweynaha** JSL ee  
Sumadeedu tahay **JSL/M/XER/M/249-  
1367/10/2012** ee ku taariikhaysan **04/10/2012**

**NO 0227** nuxurkeeduna ahaa Mamnuucida bixinta dhulka danta guud iyo hantida ma guurtada ah ee qaranka.

Sidaas darteed, anigoo Fulinaya **Amarka Madaxweynaha** waxa reeban bixinta dhulka danta guud iyo ku takrifalka hantida ma guurtada ah. Waxa kale oo laga bilaabo maanata reeban dhisida, kordhinta iyo wax ka bedelka dhul ama guri dan guud ah iyadoo aan fasax ogolaansho laga haysan Wasaaradda Hawlaha Guud Guriyeynta & Gaadiidka, sidoo kale laga bilaabo maanta waxaan laalay wixii ogolaansho hore ee dhisid ama wax ka bedel ah ee ka baxay Wasaarada Hawlaha Guud guriyeynta & Gaadiidka si loo ilaaliyo hantida qaranka.

Sidaas awgeed, waxa lala socodsiinayaa madaxda ay warqadani sida tooska ah ugu socoto iyo kuwa ogaysiinta leh inay hirgaliyaan **wareegtadan iyo degreetada madaxweynaha**. Isla markaana laga bilaabo manta ay reeban tahay bixinta dhulka danta guud iyo tan ma guurtada ahba.

Waxaa kale lala socodsiinayaa guddoomiyaasha Gobolada, maayarada magaaloyinka iyo Taliye Qaybeedyada Ciidanka Booliska in la dumoyo dhismayaasha ku dhismay sifo kasta oo sharci darro ah. nooc kasta oo ay yihiin

Waxaan si gaar ah uga codsanayaa Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Taliyaha Ciidanka Booliska in ay fulinta Degreetooyinkan manuucida dhulka danta guud gacan naga siiyaan.

**C/risaaq Khaliif Axmed**

**Wasiirka Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka**



**JAMHUURIYADDA SOMALILAND  
WASAARADDA CADDALADDA  
ARR.GARSOORKA**



**REPUBLIC OF SOMALILAND  
MINISTRY OF JUSTICE  
JUDICIAL AFFAIRS**

**WC&A.G/XW/G-2/348/13**

**Date: 26/08/2013**

Ku: Guddoomiyayaasha Maxkamada Racfa, Gobol,  
Maroodi-jeex =Hargeysa=

Ku: Guddoomiyayaasha Maxkamada Racfa, Gobol,  
Awdal =Awdal=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL, Hargeysa

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda, =Hargeysa=

Og: Madaxweynaha JSland, =Hargeysa=

**UJ: FULIN GO'AAN KASOO BAXAY GUDIGA  
CADAALADDA JSL.**

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka 106aad ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa 1aad, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu Halkan ku faafinaynaa Go'aanka lanbarkiisu yahay **MS/GGC/G-3/07/2013 ee 22/08/2013**

# WAXAY GO'AAMIYEEN

QOD.1aad.

## BEDEL GARSOORAYAAL



- 1. Garsoore Maxamed Carab Qalinle**, waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Gob/Degmo Gebilay, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Gobolka Awdal Boorame.
- 2. Garsoore Mustafe Cabdi Cali**, waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Racfaanka G/Sanaag, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamadda Rafcaanka G/Maroodi-Jeex Hargeysa.
- 3. Garsoore Siciid C/laahi Xuseen**, waxaa laga bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Ceerigaabo, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Gobol/Degmo Gebilay.

ALLAA MAHAD LEH

Xuseen Axmed Caydiid

WASIIRKA W/CADAALADDA & ARR.GARSOORKA.

*Jamhuuriyada Somaliland*



*Republic of Somaliland*


*Wasaaradda Qorshaynta*

*Planning and Development*

*Qaranka iyo Horumarinta*

Ref: WQQ&H/W/24/502/2013

Date: 01/08/2013



WASIIRKA

- ISAGOO ARKAY: Xeerka Wasaarada
- ISAGOO ARKAY: Xeerka hayadaha samafalka/Xeerka No: 43/2010
- ISAGOO ARKAY: Arjiga/codsiga uu keenay xafiiska diwaangalinta hay'adaha samafalka ee wakiilka u yahay Mudane/Marwo maxamud Maxamed Cartan
- ISAGOO ARKAY: Xeerka aas aaska Qodobka 12aad/29aad
- ISAGOO ARKAY: juwanka cashuurta dawlada lagu bixiyey
- ISAGOO ARKAY: In la diiwaangaliyo lana siiyo shahaadada **Movement of S/land Aid Development Agency** summadeedu tahay L.43.13.502.2013

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta

*Jamhuuriyada Somaliland*

*Wasaaradda Qorsheynta*

*Qaranka iyo Horumarinta*



*Republic of Somaliland*

*Planning and Development*



**(WQQH) - Hargeysa**

**(MNPDP) - Hargeysa**

Ref: WQQ&H/W/24/503/2013

Date: 03/08/2013

**WASIIRKA**

- ISAGOO ARKAY: Xeerka Wasaarada
- ISAGOO ARKAY: Xeerka hayadaha samafalka/Xeerka No: 43/2010
- ISAGOO ARKAY: Arjiga/codsiga uu keenay xafiiska diwaangalinta hay'adaha samafalka ee wakiilka u yahay Mudane/Marwo Cadnan Axmed Dhahar
- ISAGOO ARKAY: Xeerka aas aaska Qodobka 12aad/29aad
- ISAGOO ARKAY: juwanka cashuurta dawlada lagu bixiyey
- ISAGOO ARKAY: In la diiwaangaliyo lana siiyo shahaadada Makhir Prevention of **Infectious Disease and Pandemic**

summadeedu tahay  
L.43.13.503.2013



Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta

*Jamhuuriyada Somaliland*  *Republic of Somaliland*  
*Wasaaradda Qorshaynta* *Planning and Development*  
*Qaranka iyo Horumarinta*

**(WQQH) - Hargeysa**

**(MNPD) - Hargeysa**

Ref: WQQ&H/W/24/504/2013

Date: 08/08/2013

**WASIIRKA**

ISAGOO ARKAY: Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY: Xeerka hayadaha  
samafalka/Xeerka No:  
43/2010

ISAGOO ARKAY: Arjiga/codsiga uu keenay  
xafiiska diwaangalinta  
hay'adaha samafalka ee  
wakiilka u yahay  
Mudane/Marwo: Maxamed  
Cabdi Bade

ISAGOO ARKAY: Xeerka aas aaska Qodobka  
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY: juwanka cashuurta  
dawlada lagu bixiyey

ISAGOO ARKAY: In la diwaangaliyo lana siiyo  
shahaadada **Somaliland**  
**Association Accountants**  
summadeedu tahay  
L.43.13.504.2013

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta

**Jamhuuriyada Somaliland**  **Republic of Somaliland**  
Wasaaradda Qorshaynta Planning and Development  
Qaranka iyo Horumarinta

**(WQQH) – Hargeysa** **(MNPD) - Hargeysa**

Ref: WQQ&H/M/24/505/2013

Date: 15/08/2013

**WASIIRKA**

ISAGOO ARKAY: Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY: Xeerka hayadaha  
samafalka/Xeerka No:  
43/2010

ISAGOO ARKAY: Arjiga/codsiga uu keenay  
xafiiska diwaangalinta  
hay'adaha samafalka ee  
wakiilka u yahay  
Mudane/Marwo: Jamal  
Axmed Cali



ISAGOO ARKAY: Xeerka aas aaska Qodobka  
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY: juwanka cashuurta  
dawlada lagu bixiyey

ISAGOO ARKAY: in la diiwaangaliyo lana  
siiyo shahaadada Dangarad  
**Youth Development Org**  
summadeedu tahay  
L.43.13.505.2013



Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta

*Jamhuuriyada Somaliland*  *Republic of Somaliland*  
*Wasaaradda Qorshaynta* *Planning and Development*  
*Qaranka iyo Horumarinta*

**(WQQH) – Hargeysa** **(MNPD) - Hargeysa**

Ref: WQQ&H/W/24/508/2013

Date: 22/08/2013


WASIIRKA

ISAGOO ARKAY: Xeerka Wasaarada

ISAGOO ARKAY: Xeerka hayadaha  
samafalka/Xeerka No:  
43/2010

ISAGOO ARKAY: Arjiga/codsiga uu keenay  
xafiiska diwaangalinta  
hay'adaha samafalka ee

wakiilka u yahay  
Mudane/Marwo: Xaali Aw  
Muuse Faarax



ISAGOO ARKAY:

Xeerka aas aaska Qodobka  
12aad/29aad

ISAGOO ARKAY:

juwanka cashuurta  
dawlada lagu bixiyey

ISAGOO ARKAY:

in la diiwaangaliyo lana  
siiyo shahaadada **Women  
Association Gender  
Awareness** summadeedu  
tahay L.43.13.508.2013

Dr. Sacad Cali Shire

Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta

**QAYBTA AFRAAD:**

**AMARADA & GO'ANADA MAAMUL**

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

---

XIG/JSL/163/2013.

01/08/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay GULEID CONSTRUCTION AND TRANSPORTATION, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka

Shirkadaha Xeer NO.25/2004  
(Company Act of Somaliland)  
saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay  
saxeexeen sida uu qabo qodobka  
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan  
Tahay Shirkadda ku magacaaban GULEID  
CONSTRUCTION AND TRANSPORTATION,  
shaqadeedu tahay Dhismaha iyo Socdaalka  
(construction and transportation), xarunteeduna  
tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo  
ay taarikhdu tahay 01/08/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

XIG/JSL/164/2013.

04/08/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed



Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay FONEX LTD oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.


**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban **FONEX LTD**,

shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo dhoofinta  
alaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna  
tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo  
ay taarikhdu tahay 04/08/2013



Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

XIG/JSL/166/2013.

06/08/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka  
Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray  
Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer  
Shirkadaha, kaas oo awood u  
Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta  
Guud in ay Diiwaan geliso  
Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay AL AQSA IMPORT & EXPORT COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban AL AQSA IMPORT & EXPORT COMPANY, shaqadeeduna tahay Soo dejinta iyo dhoofinta alaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 06/08/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

# XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



XIG/JSL/167/2013.

14/08/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

## Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-


**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay ROBLE CONSTRUCTION CONTRACTING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.



**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban ROBLE CONSTRUCTION CONTRACTING COMPANY, shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 14/08/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**JAMHUURIYADDA**



**ALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

**OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL**

XIG/JSL/168/2013.

14/08/2013

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-



**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HIRAAL CHILDREN'S ENTERTAINMENT CENTER, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

**Markuu arkay:-** In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku magacaaban HIRAAL CHILDREN'S ENTERTAINMENT CENTER

(Astaanteeduna tahay:- Hir Cadceed soo baxaysa oo uu ku dhex yaalo magaca shirkadu) shaqadeeduna tahay Adeega Maaweelada Caruurta (entertainment Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 14/08/2013

Allaa Mahad Leh.

(Aadan Axmed Muuse)

Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND  
MAXKAMADDA GOBOLKA SAAXIL  
BERBERA

**MGS/DFL/08/2013**

**DATE.14/08/2013**

Ku: - Taliyaha Saldhiga Dhexe ee Berbera Berbera

Ku: - Duqa Degmada Barbara Berbera

Ku: - Idaacada, Radia JSL. Hargaysa Hargeysa

Ku: - Jaraa, idka Madaxa Barnaan Berbera Berbera

Og: - Taliyaha Qaybta Gobolka Saaxil. Berbera

Og: - Garyaqaanka Guud Ee qaranka Hargaysa

Og: - Lagu Fuliyaha Telecom ee Berbera Berbera

Wakiil u yahay Axmed Carab Muuse

Og: - Loo Fuliyayaal



1. Cabdi Siciid Yuusuf
2. Maxamed Siciid
3. Cibaado Saqadhi Ibraahim
4. Cali Saleebaan Maxamed
5. Sucaad Maxamed Cali
6. Rooda Caabi Cawaale
7. Saynab Xasan Xirsi
8. Qadan Ismaaciil Cimi
9. Xaliimo Cumar Maxamed
10. Faadumo Daa,uud Jaamac
11. Maryan Daa,uud Jaamac
12. Yuusuf C/laahi Cali

### **Ujeedo Xayiraad Dhul Dayran**

#### **Maxakamada Gobolka Saaxil.**

##### **Markay Aragtay**

Galdacwadeedka Fulinta ah ee Suamadiisu kor xusan tahay kana dhexeeyaa dhinacyada kor ku xusan

##### **Markay argtay**

Codsiga xayiraada dhulka ku aala degmada berbera xafada burca sheesh, dhulkaas oo Jahooyinka kala yihiin

- Waqooyi.....Dhisme
- Galbeed .....dhisme shida yare
- Bari.....wado
- Koonfur.....wado

## **Markay Aragyay**

Dhamaan Docmenti-yada loo fuliyayaasha oo wafaqsan Qodobka 89,Xm



## **Markay argtay**

Qod.293, 294, 295 XHM, hadaba maxakamada Gobolka Saaxil waxay idin faraysaa in dhulka kor ku xusan uu xayiraan yahay, waxaa Taliyaha saldhiga dhexe berbera waxaa si gaar ahna uu ilaaliyo dhulkaas, oo aan la iibin Karin hibayn Karin, la dhisi Karin ,lana kirayn Karin,sifo kalena lagu samayn Karin illaa Amar danbe maxakamada ka soo Baxayo.

**Allah**

**Mahad**

**Leh**

**GARSOORAHA MAXAKAMADA GOBOLKA SAAXIL**

**Xamse c/laahi Xirsi**

**Muuna Jibriil Yuusuf**

**K/SARE MAXKAMADA GOBOLKA SAAXIL**

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXAKAMADD DEGMADDA HARGAYSA

**MDH/DFL/150/12**



Ku: - Agasimaha Idaacada Raadyaw Hargaysa\*

Ku: - Wargaysyadda Madaxa Banaan Ee Dalka

Ku: - Guddoomiyaha Degmada G/Libaax

Ku: - Xafiiska Mulkiyadaha Guryaha ee Dawlada Hoose Hargaysa

Ku: - Dhamaan Nootayooyinka Sharciga ah ee Hargaysa

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska Degmada G/libaax

Ku: - Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka

Og: - Duqa Caasimada Hargaysa

**Ujeedo: Xayiraad Guri No, GL-M/B-1/7 iyo Guri.**  
**No. GL-M/B-1/12**

Maxakamadda Degmada Hargaysa waxay Xayiraad Saartay Maanta 18/82013 labada Guriga ee Lambar Koodu Yahay Guri No GL-M/B-1/7, iyo Guri no GL-M/B-1/12 Cabirkoodu kala yahay 8.24x6m iyo 7.5x5m Ee ku yaala Degmada G/Libaax ee ay leeyihiin ima Iima X.maxanuud X. Xasan Jihooyinkiisuna Yihiin sidan;-

Waqooyi..... dhisme

Koonfur.....Dhisme  
Bari .....dhisme  
Galbeed .....wado



Sidaa darteed Guryahaa Lama iibin Karo Lama Rahmi karo ,Lamana kala wareejin Karo Lama Dhisi karo Laguma Tasarufi karo Sifo Kale oo sharci ahna Looma Isticmaali Karo Ilaa iyo Amar Danbe oo Maxakamadeed .

Maxakamadu waxay u cuskatay xayiraadan Guriga Qod 293-294-295 ee XHM.

Allaa Mahad leh

(Sh. Xasan Qorane X.Cali)

Garsooraha Maxakamadda Degmada Hargaysa

Kaaliye:- Maxamed Cali Cilmi